

Ma garanaysay?

- Sanad walba, PPO waxay la macaamishaa kumanaan **cabasho oo ay ka mid yihiin kuwa kasocda maxbuusta socdaalka.**
- Jawaab kabixin cabashooyinkaan, PPO waxay samaysay ku dhawaan kun **talooyin kusocda maxbuuska iyo xarumaha bixinta socdaalka** sanadkii lasoo dhaafay.
- Natijoooyinka baaritaanadeena waxay xabsiga socdaalka ka dhigaan meel **cadaalad, nabad u ah** maxbuusta darafyada wadanka oo dhan.

'aniga, iyo saan hubo maxbuus kale oo badan, nasiib ayaan leenahay in aan haysano urur aan kaalmo ka raadsan karno. Waad mahadsantahay.'

*Cabashada A,
HMP Northumberland*

Runta kusaabsan PPO

- Uma shaqayno Home Office (Wakaalada Arrimaha Gudaha), Uma shaqayno Fulinta Socdaalka. PPO si **buuxda ayeey u madax banaantahay.**
- Cabashooyinkaaga aad noo osso dirto **IRC (Xarunta Bixinta Socdaalka) ma akhrinayso**, loomana isticmaalayo si liddi kugu ah.
- Sanada kasta waxaan helnaa kumanaan cabasho. **Taadana WAAN heli doonaa.**
- Hadii aan kuwaafaqno, waxaad heli kartaa **raali galin; qasaarahaaga lagu gudo; xitaa isbadal siday xaruntu u shaqeyso.**
- Waxaan doonaynaa inaan cabashadaada uga soo jawaabno **10 maalin gudahood** markaan helno.

Waayahay, marka maxaan ka caban karaa?

Waxaad ka caban karto?

Waxaad uga caban kartaa PPO arrimo nuuc kasta ah- oo ay ka mid yihiin sida shaqaaluhu kuula macaamilayaan iyo hanti kaa dhuntay.

Laakiin, waxaa jira waxyaalo aanaan baari karin :

- Kiiskaaga Socdaal.
- Cabashooyin kusaabsan daryeelka caafimaad.
- Qaanuun guud, hadii ay tahay in kabadan 3 bilood markii aad ka heshay xarunta bixinta socdaalka jawaab kusaabsan cabashadaadii asalka ahayd.
- Cabashadu waa inay ahaataa wax adiga kugu dhacay, maahan qof kale.

Sida loo cabto.

Marka sidee ugu cabtaa PPO?

Hubi inaad raacdid **sadexda tilaabe ee fufud**. Hadii adadan saas samayn, way baari karaan.

- 1 Hubi inaad wada martid habraaca cabasho ee xarunta bixinta socdaalka marka hore.
- 2 Qor qoraal yar oo noo sheegaya waxay kusaabsantahay cabashadaadu, iyo sababta aadan wali u faraxsanayn.
- 3 Noo soo dir waraaqahaaga oo dhan-oo ay kujiraan dhamaan foomamka cabashada xarunta bixinta socdaalka.

Meesha loo diro cabashadaada.

Xagee kudiraa waraaqahaaga oo dhan?

Kusoo dir **dhamaan waraaqahaaga cabashada cinwaankaan**

Prisons and Probation Ombudsman
PO Box 70769
London
SE1P 4XY

Waraaqaha aad u dirto Ombudsmanka waa lacag la'aan.

'Waad kumahadsantahay dhamaan waqtigaaga iyo dadaalkaaga aad galiso samaynta baaritaankaaga, aad ayaa looga mahadnaqayaa.'

Cabashada B, HMP Kennet

Prisons &
Probation
Ombudsman
Independent Investigations

**Sida loogu cabto
Ombudsmanka
(wakiilka cabshooyinka)**

